

**UJEEDO: HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANAAN "LEHNA SHARCI MUNICIPALLE AH"**

Maanta oo ay taariikhdu tahay **15/01/2022**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

**WAKIILKA ISKA IIBISADA:-** Bashiir Cabdi Xasan Cali, Hooyo: Nuuro Cilmi Salaad, Somali ah, Ku Dhashay: Somalia, Sanadkii: 1974, Sita: U.S.A Passport, Lr. 513142270

**IIBSADE:-** Maxamed Bashiir Cabdi Xasan, Hooyo: Sacdiyo Cabdi Yuusuf, Ku Dhashay: Kenya, Sanadkii: 1994, Degan: U.S.A  
**WAKIILKA IIBSADAHA:-** Axmed Xasan Cali, Somali ah

**TILMAAMAHA DHULKA LA KALA IIBSANAAYO**  
Dhul Banaan oo Ku yaal: Degmada: **(Afgooye Gaar ahaan Deegaanka Lafaole)**, Cabirka: **(20X45)-M**, Looto No: **302-304-306**, W.M.L: **(77145/MPN/2021)**, Tr. 26/04/2021, Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Uuna Saxiixay Dr. Saciid Cali Cosoble

**SOOHDINTA DHULKA**  
Bari: **Jid**, Koonfur: Dhul dad, Galbeed: Dhul dad, Waqooyi: **Jid**  
**QIIMAHA DHULKA: USD \$6,000** (Lix Kun Oo Doolarka Mareykanka ah).

**B-** Aniga oo ah **BASHIIR CABDI XASAN CALI**, Waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskax ahaan iyo Jir ahaanba ka fiyoow in aan ka gaday kuna wareejiyay **MAXAMED BASHIIR CABDI XASAN** Dhul banaan oo tilmaamaha isku iibsada sare ku xusan yihiin, ayna ku qoran tahay **Mulki Diriyee Ali**, Kuna gaday Wakaalad Gaar ah Ref:- SUM:MA1JAN02/2022, Tr. 02/01/2022, Kana soo baxday Notary Public Minnesota, uuna Saxiixay Bashiir Garad Dahir, Waxaa Wakaaladan Soo Wada Xaqiijiyay Wasarada Arimaha Dibada Ee D.F.Soomaaliya iyo Maxkamada Racfaanka Ee Gobolka Banaadir, Waxaan kale oo aan Cadaynayaa in dhulkaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskan, Sidaas daraadeed Wixii Ceebaal ah, ee Ka Yimaada Dhulkaan Sida Danguud, Dukuminti Ka Horeeyey dukumintigaan, dukuminti been abuur ah, ama Duris Sharci iyo Wixii La Mid ah aniga ayaa Mas'uul Ka ah, Waxaan Kale oo Cadeynayaa in aan u Qaday Mulki Diriyee Ali Dhamaan Lacagta Sare Ku Xusan.

**T-** Aniga oo ah **AXMED XASAN CALI** Ahna Wakiilka Iibsadaha dhulkaan, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan u Gudoomay Iibsadaha Milkiyada Dhulkaan una Saxiixay Beecan.

**J-** Aniga oo Kala ah 1-Geedi Jaamac Mataan, 2-Nuur Muxumed Wardheere Waxaan Cadaynayaa in aan Markhaatiyaal iyo Goob Joogba Ka nahay Beecan.

**X- ASALKII HORE:** Cabdi Xaashi Cabdulle RL:- 2167, Tr. 27/02/2014, Sabarlog No: 46/2167/2014, Tr. 27/02/2014, Kana Soo Wada Baxeen D/H Ee Degmada Afgooye Cabirka (40X60)-M Looto No 300 ilaa 307.

**SAXIIXA WAKIILKA ISKA IIBISADA**

BASHIIR CABDI XASAN CALI

*Bashiir Hassan*

**SAXIIXA WAKIILKA IIBSADAHA**

AXMED XASAN CALI

**SAXIIXA MARKHAATIYAASHA**

1- GEEDI JAAMAC MATAAN

2- NUUR MUXUMED WARDHEERE

**(XAFIISKA NOOTAAYAHA)**

REP. 053/T.P.N/22, Tr. 15/01/2022, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:-**Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **Bashiir Cabdi Xasan Cali** Ahna (Wakiilka Iska iibsada), 2- **Axmed Xasan Cali** Ahna Wakiilka Iibsadaha) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Beecan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Kevdriyey Nuqul

NOOTAAYAHA

**Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"**



*[Signature]*



**MASAWIRKA WK/ISKA IIBISADA**

Bashiir Cabdi Xasan Cali



**MASAWIRKA WK/ IIBSADAHA**

Axmed Xasan Cali



**MARKHAATIYAASHA**

**1- Geedi Jaamac Mataan**



**2: Nuur Muxumed Wardheere**







## XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

### UJEEDO: HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANAAN OO MUNICIPALLE AH

**Muqdisho:** Maanta oo ay taariikhdu tahay **26/04/2021**, anigoo ah **Dr. Saciid Cali Cosoble**, ahna Nootaayaha Muqdisho, xafiisna ku leh inta u dhaxaysa Masjidka Abuhurayra iyo Shirkadda Dahabshiil ee Suuqa Bakaaraha ee Magaalada Muqdisho, waxaa xafiiska iigu yimid ayagoo heshiis ah, mudanayaasha hoos ku xusan:

<b>WAKIILKA ISKA IIBIYAHA:</b> CABDI CALI MAXAMED MAXAMUUD, Hooyo: Xaawo Xaashi Ibraahim, Somali ah, Ku Dhashay: ETHIOPIA, Sanadkii: 1976, Degan Muqdisho, Leh: National ID.NO., Lr. 27606055024338.	<b>IIBSATO:</b> MULKI DIRIYE ALI, Hooyo: Xabiibo Xasan Jaay, Somali ah, Ku Dhalatay: G/kacyo, Sanadkii:-- , degan USA. <b>WAKIILKA IIBSATADA:</b> BASHIIR CABDI XASAN.
<b>WARBIXINTA DHULKA LA KALA IIBSANAAYO</b> Dhulkaan oo ku yaal:, Degmada: <b>Afgooye Gaar ahaan Deegaanka Lafoole</b> , Cabirka: <b>(20X45)-M</b> , Looto No: <b>302-304-306</b> , W.M.L: 25805/2018, Tr. 14/04/2018, Kana Soo Baxay Nootaayo Xamar , Dr. Cabdirashiid Cabdullaahi Maxamuud.	<b>SOOHDINTA DHULKA</b> Bari: <b>Jid</b> , Koonfur: Dhul dad, Galbeed: Dhul dad, Waqooyi: <b>Jid</b> . <b>QIIMAHA DHULKA:</b> <b>USD \$5,700</b> (Shan Kun Iyo Toddobo Boqol Oo Doolarka Mareykanka ah).
<b>ASALKII HORE EE DHULKA:</b> Cabdi Xaashi Cabdulle , Cabirka: <b>(40X60)-M</b> Looto No: <b>300-307</b> , Rasiid No. 2167, Tr. 27/02/2014, Sabarlog No: 46/2167/2014, Tr. 27/02/2014, Kana Soo Wada Baxeen Dawladda Hoose Afgooye.	

**WAKIILKA ISKA IIBIYAHA:** Aniga oo ah **Cabdi Cali Maxamed Maxamuud**, waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskaxda iyo caqligaba kafiiyoow in aan ka gaday kuna wareejiyay **Mulki Diriyee Ali** dhul banaan oo tilmaamihiisu sare ku xusan yihiin, uuna ku qoran yahay **Salaad Cali Maxamed**, kuna gaday warqada wakaalada **guud Rep. No. 20610/2013, Tr. 09/04/2013**, kana soo baxday Nootaayo Muqdisho , uuna saxiixay Dr.Maxamed Cabdulqaadir Sh Xasan , waxaan kale oo aan cadaynayaa in dhulkaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskan, isla markaana aan anigu mas'uul ka noqon doono wixii ceebaal milkiyadeed ah ee la xiriira isla dhulkaan, waxaan kaloo caddaynayaa in aan u qaaday dhammaan lacagta sare ku xusan, wixii taariikhda sare ka danbeeyana dhulkaan milkiyadiisa, faa'iidadiisa iyo bixinta canshuureedba wuxuu u wareegay iibsato **Mulki Diriyee Ali**.

**WAKIILKA IIBSATADA:** Aniga oo ah **Bashiir Cabdi Xasan**, waxaan dhankayga heshiiskan ku caddaynayaa in **Cabdi Cali Maxamed Maxamuud** si buuxda iigu wareejiyay dhulkaan lehna sifaha uu ku soo xusay isla markaana aan u gudoomay iibsatada dhulkaan, una saxiixay kaalinteeda heshiiskan.

**MARKHAATIYAASHA:** Anaga oo kala ah **1-C/risaaq Salaad Yuusuf**, **2-Daahir Axmed Maxamed**, waxaan qoraalkaan ku cadaynaynaa in aan markhaati iyo goob joogba ka nahay beeca dhulka sare ku xusan.

**SAXIIXA WAKIILKA ISKA IIBIYAHA**

CABDI CALI MAXAMED MAXAMUUD

*Cabdi Cali Maxamed*

**SAXIIXA WAKIILKA IIBSATADA**

BASHIIR CABDI XASAN

*Bashiir Cabdi Xasan*

**SAXIIXA MARKHAATIYAASHA**

1- C/RISAAQ SALAAD YUUSUF

2- DAAHIR AXMED MAXAMED


Rep. 77145/MPN/2021

(CADDEYNATA NOOTAAYAHA)

Tr. 26/04/2021

Anigoo ah Nootaayaha Muqdisho, **Dr. Saciid Cali Cosoble**, waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa **1- Cabdi Cali Maxamed Maxamuud** (ahna wakiilka iibiyaha dhulka), **2- Bashiir Cabdi Xasan** (ahna wakiilka iibsatada dhulka), iyo waliba Labada Nin ee Soomaaliyeed oo dhanka maragga ka caawiyey oo kor ku xusan, Dadkaan oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadaas ay leeyihiin waxay heshiiskan igula saxiixeen Xafiiska iyaga oo xis qaba raalina ah, Caafsiidka iyo Niskooduna taam yahay, Cid khasbeysana aysan jirin, Waana Beec ansax ah oo Waafaqsan Shareecada Islaamka.

By: ABDULKADIR



MASAWIRKA WAK/IIBIYAHA CABDI CALI MAXAMED MAXAMUUD


MASAWIRKA WAK/BASHIIR CABDI XASAN



=MASAWIRADA MARKHAATIYAASHA=

MARAGA 1-AAD C/risaaq Salaad Yuusuf

MARAGA 2-AAD Daahir Axmed Maxamed



Bee  
R: 053/T. P.W/2022  
Tr: 15/01/2022  
20x45-m  
C: 302-304-306

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال

SOMALI REPUBLIC

WARAQADDA AQOONSIGA

بطاقة الهوية

IDENTITY CARD



L. Qaranka/الهوية رقم/National ID

27606055024338



Magaca/الاسم/Name

ABDI

ALI MOHAMED



Taariikhda dhalashada/الميلاد/Birth

05 Jun 1976

ETHIOPIA

Taariikhda la bixiyay/الاصدار/Issue

13 Jun 2016

MOGADISHU

Taariikhda uu dhacayo/الانتهاء/Expiry

12 Jun 2021

Lab/Dheddig/الجنس/Gender

MALE





KUSOCOTO: CIDDA AY KHUSEYSO  
UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH

h-103/2022

TR: JANUARY, 02, 2022  
SUM: MA1JAN02/2022

Anigoo ah, **MULKI DIRIYE ALI**, ku dhashay Somalia, sanadkii 1988 kii. Hooyadayna la yiraahdo **XABIIBO XASAN JAAY**, Waxaan deganahay 2828 Portland Ave. Minneapolis, MN. Tell: +1 (317) 728-0223. Haysta sharciga USA

Waxaan qoraalkaan ku caddaynayaa aniga oo xisqaba in aan wakiishay **BASHIIR CABDI XASAN**, Somali ah. Hoyadiis la yirahdo: **NUURO CILMI SALAAD**. Waxaan u wakiishay wakaalad gaar ah, in uu maamuli karo, xafidi karo, gadi karo, hibeyn karo, dhisi karo, kireyn karo, u doodi karo oo qareen u qaban karo, maxkamadaha dalka hortooda igu matali karo, dhulkan hoos kuxusan oo kaliya. Tilmamaha guriga


Dhul ku yaala Muqdisho, degmada Afgooye gaar ahaan deegaanka lafoole. Cabirka: (20X45)-M, Looto No: 302-304-306, W.M. L: (77145/MPN/21), Tr. 26 / 04/2021, kana soo baxday nootayo Muqdisho , uuna Saxiixay Dr. Saciid Cali Cosoble.

Sidaa daraadeed waxaan ugu danbeyntii caddaynayaa in wakiilkeygu aan awoodaas aan siiyay uu umadax banaanyahay. Ka caamilideeda wax la iiga baahan karo aysanjirin. Waxaan shaqsikasta ka codsanayaa inuu u tixgaliyo wakiilkeyga dhamaan xuquuqihii aanlahaa oodhan

Wakaalad bixiyaasha:

**MULKI DIRIYE ALI**, Sixiix MULKI Tr: January, 02, 2022

State (Gobalka): Minnesota, County Hennepin	Hortayda waxaa yimid kuna saxiixday: <b>MULKI ALI</b>
Notary Name: Bashir Garad Dahir Sixiix: <u>[Signature]</u>	Wata aqoonsiga: USA Documents
2910 Pillsbury Ave S ste 204A, Minneapolis, MN 55408, Tell 612-999-0500	



SM



MII | 220111 | S

Kaas la hubiyay



[Signature]  
13/07/2022

[Signature]  
13-01-2022





XAFHISKA NOTAAYAHA XAMAR  
PUBLIC NOTARY OFFICE

14/04/2018

ORIGINAL

MOGADISHU-SOMALIA

JAMHUURIYADDA F.SOOMAALIYA

Noolayo Xamar

Public Notary Office Mogadishu-Somalia.

XAFHISKA NOTAAYAHA XAMAR  
PUBLIC NOTARY OFFICE

14/04/2018

ORIGINAL

MOGADISHU-SOMALIA

**Ujeedo:- HESHIIS KU SAABSAN HIBO DHUL MUNICIPALE AH.**

Muqdisho maanta oo ay taariikhdu tahay 14/04/2018, Maxamed Axmed Yuusuf (Gaaraxo), oo soomaali ah, degan Xamar, dhashay sanadkii 1958kii, oo hooyadey la yiraahdo Beydan Xirsi Cabdi, lehna P/port No. P00722664-Soomaaliya, waxaan qoraalkaan ku caddeynayaa, iyadoo uu xiskeygu taam yahay, in aan u hibeeyey, oo aan ku wareejiyey, (Salaad Cali Maxamed, oo soomaali ah, degan Xamar, dhashay sanadkii 1977kii, oo hooyadiis la yiraahdo Caanood Axmed Yuusuf) waxaana ka socda oo u saxiixaya Cabdi Cali Maxamed dhulkaas oo ku yaala degmada Afgooye, deegaanka Lafoole, kana kooban 24-boos + 7 boos oo min 20x15-mitir ah, oo lotto No. 92, 93, 94, 95, 96, 97, 98, 99, 100, 101, 102, 103, 104, 105, 106, 107, 108, 109, 110, 111, 112, 113, 114 iyo 115 iyo 293, 292, 302, 304, 305, 306 iyo 307. Soohdintiisu tahay Galbeed/Koofur/Waqooyi/Bari waxaa ka xiga jidad, sida ku cad Warqadd Milkiyadda ee Lam. yahay 25714/2018 ee tr. tahay 14/04/2018, uuna qoray nootaayo Muqdisho, uuna ku saxiixan yahay Dr' Cabdirashiid Cabdullaahi Maxamuud, Hadaba iyadoo hadalka lasoo qoray iyo kan soo socdaba ay wada xiriiraan, ayaan misna waxaan mar labaad caddeynayaa anigoo ah Maxamed Axmed Yuusuf in dhulkaan aan hibeeyey, uu ka madax-banaan yahay rahan iyo sheegasho Dad kale, islamarkaana ay milkiyaddii dhulkaani, mirahiisa & Faa'idadiisaba u wareegtay Salaad Cali Maxamed, Sidaas darteed, wixii dhib ah, ama dood ah, ama duris sharci ah, amase sheegasho dad kale ah, ee ka yimaada milkiyadda dhulkaan banaan, waxaa damiin iyo masuul buuxa ka ah anigoo ah Maxamed Axmed Yuusuf, waxaana marqaatiyaal ka ah ragga hoos ku saxiixan, oo soomaali wada ah, wada degan xamar.

Saxiixa Warejiyaha.

Maxamed Axmed Yuusuf

Saxiixa La wareegaha.

Salaad Cali Maxamed

Wak. Cabdi Cali Maxamed

Marqaatiyaalka

1. Xasan Cabdullaahi Xasan

2. Cabdi Cali Jimcaale

Rep. No. 25805/2018.

Saxiixyadda La sugay

Muqdisho 14/04/2018

Anigoo ah Dr' Cabdirashiid Cabdullaahi Maxamuud, oo nootaayo xamar ah, waxaan Caddeynayaa, in saxiixyadda kor ku qorani ay yihiin, kuwii runta ahaa, ee Maxamed Axmed Yuusuf oo soomaali ah, degan xamar, {ahna iska hibeeye}, iyo Cabdi Cali Maxamed,, oo soomaali ah, degan Xamar {ahna wakiilka La wareege}, iyo marqaatiyaalka kor ku qoran, oo soomaali wada ah, waxay heshiisnaan ku wada saxiixeen horteyda.

=NOOTAAYAHA=

(Dr' Cabdirashiid Cabdullaahi Maxamuud)



REFNO=77143/21-W.DH(40X60)-M-100H/92-93-94-95-  
(96-97-98-99)TR=26/04/21

REFNO=77144/21-W.DH(20X30)-M-100H/292-293)TR-26/4/21  
W.DH(20X30)-L-307-305)

REFNO=77145/21-W.DH(20X45)-M-100H/302-304-306)TR-26/4/21





XAFIISKA NOTAAYAHA XAMAR  
PUBLIC NOTARY OFFICE

14/04/2018

ORIGINAL

MOGADISHU-SOMALIA

JAMHUURIYADDA F.SOOMAALIYA

Nootayo Xamar

Public Notary Office Mogadishu-Somalia

XAFIISKA NOTAAYAHA XAMAR  
PUBLIC NOTARY OFFICE

14/04/2018

ORIGINAL

MOGADISHU-SOMALIA

**Ujeedo:- HESHIIS KU SAABSAN KU WAREEJIN SAAMI DHUL MUNICIPALE AH.**

Muqdisho maanta oo ay taariikhdu tahay 14/04/2018, Anagoo kala ah 1. Xasan Hilowle Cabdi Rooble, oo soomaali ah, degan xamar, dhashay sanadkii 1970kii, oo hooyadeey la yiraahdo Faadumo Maxamuud Warsame, sita License No. 2330-PRA, & 2. Cabdi Xaashi Cabdulle, oo soomaali ah, degan xamar, dhashay sanadkii 1963kii, oo hooyadeey la yiraahdo Xaawa Cilmi Jaamac (La sawiray), waxaanu qoraalkaan ku caddeynaynaa, iyadoo uu xiskeenu taam yahay, in aanu ku wareejiney saamigii dhuleed oo uu xaqa u lahaa mudane (Maxamed Axmed Yuusuf (Gaaraxo), oo soomaali ah, degan Xamar, dhashay sanadkii 1958kii, oo hooyadiis la yiraahdo Beydan Xirsi Cabdi) dhulkaas oo ku yaala degmada Afgooye, deegaanka Lafoole, kana kooban 24-boos + 7boos oo min 20x15-mitir ah, oo lotto No. 92, 93, 94, 95, 96, 97, 98, 99, 100, 101, 102, 103, 104, 105, 106, 107, 108, 109, 110, 111, 112, 113, 114 iyo 115 iyo 293, 292, 302, 304, 305, 306 iyo 307, Soohdintiisu tahay Galbeed/Koofur/Waqooyi/Bari waxaa ka xiga jidad, sida ku kala cad Warqaddaha Lahaanshaha dhulka oo kala ah:- (1). BB/46/2156/2014 ee tr. tahay 27/02/2014, (2). BB/46/2155/2014 ee tr. tahay 27/02/2014, iyo (1). BB/46/2167/2014 ee tr. tahay 27/02/2014, (2). BB/85/3926/2014 ee tr. tahay 27/02/2014 iyo (3). BB/85/3925/2014 ee tr. tahay 27/02/2014, kana soo wada baxay Dawladda hoose ee Afgooye, markii hore waxaan shirkad ku ahayn dhulka sida ku cad Rep. No. 11454/2011 ee tr. tahay 07/02/2011, uuna qoray Nootaayo Banaadir, kuna saxiixan yahay Dr' Cabdiraxmaan Maxamuud Cali (tima-cadde), Hadaba iyadoo hadalka lasoo qoray iyo kan soo socdaba ay wada xiriiraan, ayaan misna waxaan mar labaad caddeynaynaa anagoo ah Xasan Hilowle Cabdi iyo Cabdi Xaashi Cabdulle in dhulkaan aanu wareejinay uu ka madax-banaan yahay rahan iyo sheegasho Dad kale, islamarkaana ay milkiyaddii dhulkaani, mirahiisa & Faa'idadiisaba u wareegtay Maxamed Axmed Yuusuf, Sidaas darteed, wixii dhib ah, ama dood ah, ama duris sharci ah, amase sheegasho dad kale ah, ee ka yimaada milkiyadda dhulkaan banaan, waxaa damiin iyo masuul buuxa ka ah anagoo ah Xasan Hilowle Cabdi iyo Cabdi Xaashi Cabdulle, waxaana marqaatiyaal ka ah ragga hoos ku saxiixan, oo soomaali ah, wada degan xamar.=====

Saxiixa Warejyaha.

Xasan Hilowle Cabdi Rooble

Saxiixa Wareejiyaha

Cabdi Xaashi Cabdulle

Saxiixa La wareegaha.

Maxamed Axmed Yuusuf

Marqaatiyaalka

1. Cabdi Cali Jimcaale

*Cebo*

Rep. No.25714/2018.

Saxiixyadda La sugay

2. Xasan Cabdullaahi Xasan

Muqdisho 14/04/2018

Anigoo ah Dr' Cabdirashiid Cabdullaahi Maxamuud, oo nootaayo xamar ah, waxaan Caddeynayaa, in saxiixyadda kor ku qorani ay yihiin, kuwii runta ahaa, ee Xasan Hilowle Cabdi Rooble iyo Cabdi Xaashi Cabdulle, oo soomaali ah, degan xamar, {ahna wareejiyeyaasha Saami dhul}, iyo Maxamed Axmed Yuusuf, oo soomaali ah, degan Xamar {ahna La wareege saami dhuleed}, iyo marqaatiyaalka kor ku qoran, oo soomaali wada ah, waxay heshiiskan ku wada saxiixeen horteyda.

=NOOTAAYAHA=  
(Dr' Cabdirashiid Cabdullaahi Maxamuud)



*Signature of Dr. Cabdirashiid Abdullahi Mohamud*

H1B0

24+7-Boos

lotto 92 11ae 115


292-293

302-304

305-306-307

Rep 25805/2018

x 14/4/2018





**MHUURIYADDA SOOMAALIYA**  
**XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO**



**UJEEDDO:- WAKAALAD GUUD**

Maanta oo ay taariikhdu tahay 09/04/2013 Anigoo ah Dr. Maxamed Cabdulqaadir Sheekh Xasan. Xafiis Nootaayo ahna ku leh magaalada Muqdisho, Inta u dhaxeysa Xarunta Shirkada Isgaarsiinta Telecom Somalia iyo Masjidka Xareed ee wadada H/Wadaag, waxaa ii yimid ayagoo heshiis ah Mudanayaasha hoos ku qoran oo I weydiistey in aan u kala qoro heshiiska Wakalaad Guud. Waana kan qoraalka Wakalaada Guud oo Faahfaahsan:-

<b>Magaca Wakiishaha</b> Hooyo Lehna Passport No. Dhashay Dagan	Salaad Cali Maxamed Maxamuud. Caanood Axmed Yuusuf. P00143094-Somalia 1977.Kii Xamar	<b>Magaca Lawakiishaha</b> Hooyo Jira Dagan	Cabdi Cali Maxamed Maxamuud Xaawo Xaashi Ibraahim. 35-Sano Xamar

**Salaad Cali Maxamed Maxamuud.** Waxaan qoraalkan si buuxda ugu cadeynayaa in aan Wakiishay Walaalkey: **Cabdi Cali Maxamed Maxamuud.** Waxaana U Wakiishay oo aan siiyay Wakalaad Guud oo ku saabsan Dhamaan Hantideyda Guurto & Ma Guurto, Mood & Noolba. In uu Gadi Karo, Dhisi Karo, Ijaari Karo, U dacwoon Karo, Qareen u Qaban Karo, Uga Doodi Karo Maxkamadaha hortooda, Bangiyada Xisaab uga furi karto, Magacayga ku qori karo Hanti cusub. Kana sii wareejiin Karo.

B. **Salaad Cali M/ed M/nuud.** Waxaan cadeynayaa in aan mas'ul ka ahay waxii burin ku yimaada shaqada uu ku qabto wakaaladan walaalkey.

T. **Cabdi Cali Maxamed Maxamuud.** Waxaan cadeynayaa in aan aqbalay wakiilnimada uu i wakiishay walaalkey Salaad Cali Maxamed Maxamuud.

J. \_\_\_\_\_

X. \_\_\_\_\_

**Markhaatiyaasha**

1. Axmed Cali Weheliye.

2. C/raxmaan Maxamed Muuse.

3. Daahir Aaden Dhoore

**SAXIIXA WAKIISHAHA.**

Salaad Cali Maxamed Maxamuud

*Salaad*

**SAXIIXA LAWAKIISHAHA.**

Cabdi Cali Maxamed Maxamuud

*Cabdi Cali*

**XAFIISKA NOOTAAYAHA**

**REP NO. 20610/2013.TR.09/04/2013.MUQDISHO.** Anigoo ah Nootaayaha Muqdisho:- Dr Maxamed Cabdulqaadir Sh. Xasan. waxaan sugayaa in saxiixyada kor ku xusan ay yihiin saxiixyadii dhabta ahaa ee Awood Bixiyaha: Salaad Cali Maxamed Maxamuud. Awood Qaataha: Cabdi Cali Maxamed Maxamuud iyo Markhaatiyaasha. Waana laga saxiixay ayagoo raali ah, caafimaad qaba, xiskooduna taam yahay, cid khasbeysana aysan jirin, ka dib markii loo akhriyey qoraalka heshiiskan Wakalaada Guud.

**NOOTAAYAHA:-**

**DR. MAXAMED CABDULQAADIR SH. XASAN.**

*Dr. Maxamed Cabdulqaadir Sh. Xasan*







**DOWLADDA HOOSE EE AFGOOTE**  
**WAAXDA HOWLAHA GUUD & DHULKA**

40X60 L 300-307

Xaashida Lacag Qabashada No.A **2167**

Mud/Mar: Cabdi Xaashi Cabdulle

Waxaan Ka Qabtay Sh. So. 1520,000/- Malyan shan  
boqol iyo labaatan kun ijadi ah

Oo ah: 4-2-2 DHUL BIXIIN

Afgooye: \_\_\_\_\_  
B- Qofka Lacag Bixiyaha  
T- Maamulka Lacagta  
J- Nuqul ku haraya Baloogga



ku woyeth

20 x 30-446

lot 301-303

Rep 25790/2018

to 12/4/2018


ku woyeth

5-Boos

lot 302-304-305-306-307

Rep 25714/2018

to 12/4/2018



2018



DATE

**Jamhuuriyadda Soomaaliya**

Date:12/09/20

Ujeeddo: Heshiis kala gadasho dhul Goof ah

Muqdisho, maanta oo ay taariikhdu tahay 12/09/2010 Anigoo ah C/laahi Cali Kulmiye soomaali ah, hooyadey tahay Xaliimo Afrax Maxamed, ku dhashay Afgooye sannadkii 1970kii, degan Lafoole lehna (Sawirka sare ku dhegan) kana caafimaad qaba maskaxda iyo jirkaba cid i qasabteyna aysan jirn qowl & ficilba, waxaan cadeynayaa in aan iska gaday dhul goof ah oo aan ku leeyahay degmada Afgooye Duleedka Jaamacadda Lafoole ahna hal goof oo xiran warqadda mulkiyadda 10070/10 ee Tr.12/09/2010, kana soo baxday Nootaayo Banaadir(timacade) & Warqada Tr.13/2/2005 ee ka soo baxday Garyaqaan Dr. Maxamed xuseen Rooble laga yaqaano Lafoole Jahooyinkiisu kala yihiin: **Konfur Xasan Abiikar maxamed Barri Mac. Xasan Rabbane, Waqooyo Xasan Hilowle Cabdi, Galbeed Jid,** waxaan dhulkaas goofka ah ka gaday Xasan Hilowle Cabdi, soomaali ah, ina Faadumo Maxamuud ku dhashay Raage Ceele jirta 40 Sano, degan C/biyaha, waxaan uga gaday lacag dhan \$62000 (Lixdan & labo kun oo doolarka mareykanka ah) gacan saar ah kala bax ah, wuxuu dhulkaasi ka madax bannaan yahay deyn, rahan, sheegasho cid kale anigoo ah iska gadaha ayaa damaanad qaadaya haddii wax ka yimaadaan mulkiyadiisa, sidaasna waxaa mulkiyada dhulkaasi ku wareegtay Xasan Hilowle Cabdi, waana aqbalay beecaas gataha, waxaan markhaatiyaalka ah :

1. Maxamuud Cabdi Maxamed \_\_\_\_\_
2. Maxamuud Jimcaale Xaayoow \_\_\_\_\_
3. Cabdi Jimcaale Xaayoow \_\_\_\_\_
4. Maxamed Nuur Muudey \_\_\_\_\_
5. Jimcaale Maxamuud Jimcaale \_\_\_\_\_

Iska gadaha

C/laahi Cali Kulmiye

gataha

Xasan Hilowle Cabdi

Xafiiska Nootaayo BanaadirSaxiixa la SugayREF 10071/10

Anigoo ah xafiiska nootaayo banaadir C/raxman Maxamud Cali (Timacadde) ee ku yaala degmada wadajir agagaarka KM4 waxaan halkaan ku sugayaa in saxiixa sare ku qoran uu yahay kii dhabta ahaa ee iska gadaha C/laahi Cali Kulmiye iyo markhaatiyaasha 1 . Maxamuud Cabdi Maxamed 2. Maxamuud Jimcaale Xaayoow 3. 4. Maxamed Nuur Muudey, 5. Jimcaale Maxamuud Jimcaale waxa ayna ku saxiixeen xafiiska dhexdiisa iyadoo aan cidina qasbin kadib markii ay iska akhriyeen, waxaan ku qoray oo ka saxiixay diiwaanka guud ee nootaayadda.

**Xaafiiska Nootaayo Banaadir**  
Dr.C/raxmaan Max'uud Cali (Timacadde)



**DOWLADDA HOOSE EE AFGOOYE  
WAAXDA HOWLAHA GUUD & DHULKA**

No. A **2167**

Soo Gelidda Warqadda

Bollettario N. 46

Tirsi: 2167

Bolietta No. 2167

Taariikh: 27/02/014

Sannadka. 2014

**WARQADDA LAHAANSHAHA DHULKA**

Mud/Mar: Cabdi Xaashi Cabdulle

Og: Tal. Ciidanka Booliska Dowladda Hoose Afgooye -Afgooye

Mudanaha/Marwada kor ku Qoran waxaa loo Oggoladey inuu/hay dhisto carish, Baraako ama

Guri dhagax Ah 40 x 60 Oo uu ka dhiso Cad dhul ah oo

Laha Guri kuna Yaala Xaafada Jafole Sochidintisuna tahay L300-307

X waqooyi \_\_\_\_\_ X Galbeed \_\_\_\_\_ X Bari \_\_\_\_\_

Iyo Koonfur \_\_\_\_\_

Warqaddaan xaq waxaad ugu leedahay-muddo Labo iyo Toban (12) bilood Oo Maanta

Ka Bilaabata Fasax la'aan Inaad Dhulka Dhisatid

Warqadda Labag Dabashada No 2167

Afgooye Taariikh 27/02/014



Agaasimaha Howlaha Guud iyo Dhulka

Xaaskiyaha Dowladda Hoose

Guud Maga

Ku woreda

20 X 30-44

10R 301-303

Rep 25790/2018

to 14/4/2018



Ku woreda

5-Boos

10th 302-304-305-306-307

Rep 25714/2018

to 14/4/2018






**FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA Tr. 17/01/2022**

Aniga oo ah **Sayd-Cumar C/llaahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Bashir Cabdi Xasan Cali** oo ah Qaadaha Dukumintiga Uu Ku Qoran Yahay Iibsade **Maxamed Bashiir Cabdi Xasan** Dukumiintiga **Original+ AATO** Beeca Dhulka ee **Rep No. 053/T.P.N/22, Tr. 15/01/2022**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

<b>Magaca Iibsadaha</b>	Maxamed Bashiir Cabdi Xasan
<b>Cabirka</b>	20X45
<b>Ku Yaallo</b>	Degmada Afgooye Gaar ahan Deeganka Lafoole
<b>Lotto Lambar</b>	302-304-306
<b>W.M.L</b>	7714/MPN/2021, Tr26/04/2021 Ka soo baxday Nootaayo Muqdisho
<b>Taariikhda Beeca</b>	<b>15/01/2022</b>
<b>La Socoto</b>	<input checked="" type="checkbox"/> Wasaarada Maaliyadda <input checked="" type="checkbox"/> Dowladda Hoose

**Qaadaha Iibsadaha:** Aniga oo ah **Bashiir Cabdi Xasan Cali**, Degan **Muqdisho**, Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Dhulka faah faahintiisu Sare ku cadahay Uuna leeyahay **Maxamed Bashiir Cabdi Xasan**.



**SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA**

**Sayd-Cumar C/llaahi Maxamed**

**SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA**

**Bashiir Cabdi Xasan Cali**